



MINNEAPOLIS
PUBLIC SCHOOLS

Urban Education. Global Citizens.

September 19, 2016

Gacaliyeyaal Qoysaska Green Central,

Dugsiyada Dadaweynaha Minneapolis (MPS) ayey dhab ka tahay inay siiyaan ardayda oo idil waxbarasho heer sare ah, si cunugaagu ugu guulaysto dugsiga iyo noloshiisa. Si aan u xaqiijino guulaysiga cunugaaga, waxaan u dejinnay heer naqdi sarreeya ee ka fal celin kara waxyaabaha lagu baro fasalladeenna. Sannad dugsiyeedka soo socda waxaan eegaynaa qiimayn cabbirro kala duwan oo muujinaya siyaabaha dugsigeenu u guulaysanayo. Tan ayaa xaqiijinaysa inaan gaarno himmiladeenna ah in ardayda oo idil ay ku guulaystaan dugsiga iyo noloshooda..

sannadkan Green Central ayaa loo qoondeeyey inuu noqdo dugsi mudnaan leh (Priority school) sida uu qabo Qaynuunka Federaaliga ah ee Dugsiga Hoose & Sare (Elementary and Secondary Education Act) (ESEA). Qoondaynta ayaa ku salaysan xogta hawl fulinta ardayga taasoo ku meelaysay dugsigeenu inuu ka mid yahay boqolkiiba shanta ugu hoosaysa bugcadda guul gaadhka ardayda u dhexeeya ee gobolka Minnesota.

Sannad dugsiyeedkan waa sannadka koowaad ee caawinaad saddex sano ee habraaca hagaajinta dugsiga ee adag (three-year intense school improvement support). Xoog saaridda ugu muhiimsan ee dugsigeenu waa in la kordhiyo hawl fulinta ardayda. Habraaca dib-u-hagaajinta dugsiga waxaa jihaynaya Dugsiyada Dadaweynaha Minneapolis, iyadoo ay kaalmaynayso Waaxda Waxbarashada Minnesota. Hoggamintaasi iyo kaalmadaasi darteed, waxaan si wax ku oolnimo leh u beddelayna habka dugsigeenu u shaqeeyo si aan u hagaajino bay'adda waxbarasho ee ardaydeenna oo idil.

Qoysaska iyo bulshada ayaa xuddun u ah qorshaheenna dib-u-hagaajinta dugsiga. Waxaa lugugu martiqaaday inaad nagala soo qaybgasho kulankeena sanadlaha ah ee Xaalada Dugsiga iyo Kulanka Title I. Ula jeedka Xaalada Dugsiga iyo Kulanka Sanadlaha ah ee Title I waa in lagu siiyo waalidka/iyo daryeelayaasha warbixin ku saabsan xaalada dugsiga ku sugan yahay hada iyo qorshaha hagaajinta ee dugsiga. Dugsigu waxaa uu waalidka la wadaagi doonaa hadafkiisa iyo waxyaabaha uu mihiimada siinayo iyo hababka uu ku gaarayo hagaajinta iyo waalidku sidii ay uga qaby qaadan lahaayeen waxbarashada sanadkoo idil. Kulankani waxaa lagu sharixi doonaa ula jeedka Title I iyo xiriirka waalidiinta/daryeelayaasha la rajaynayo in ay helaan waxyaabo qoyseeya kor u kaca waxbarasho ee caruurtooda. Haddii uusan kulanku dhicin ama aadan helin warbixinta, Na soo waydii maalinta iyo wakhtiga kulanka la qaybanayo

Ka qayb qaadashadaada iyo kaalmadaada ayaa muhiim u ah guulaysiga cunugaaga. Waxaan kugu dhiirrigalinaynaa inaad la xiriirto cunugaaga macallimiintiisa, saad u barato sida ugu wanaagsan ee cunugaagu fasalka wax ugu baran karo. waa kuwaan hoose dhawr waxyaabood eed samayn karto ee ka caawin kara cunugaaga waxbarashadiisa:

- Hubi in cunugaagu dugsiga tago maalin walba waqtiga loogu talagalay.
- U same meel deggan oo cunugaagu ku qabto shaqo gurigiisa ama wax ku akhriyo.
- Kala hadal cunugaaga dugsiga.

Waxaan idinka rajeynaynaa inaad sii waddaan ku shuqlanaanta iyo wada shaqaynta si sannad dugsiyeedkani u noqdo mid wanaagsan! Fadlan nagala soo xiriire 612.668.3730 haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ee la xiriira dadaalka dib-u-hagaajinta dugsiga ama sidaad uga qayb qaadan karto.

Si daacadnimo leh,

Matthew Arnold
Maamule/Principal